Alberta

**War** saxaafadeed

# Miisaaniyadda 2026: Diiradda Saarista Waxa Muhiimka ah

Febraayo 26, 2026

## Miisaaniyadda 2026 waxay diiradda saaraysaa waxa muhiimka ah, waxayna qaadanaysaa go'aanno nidaamsan oo masuuliyad leh iyo tallaabooyin go'aan adag leh.

Hubanti la'aanta dhaqaalaha caalamka, hoos u dhaca qiimaha saliidda iyo kororka degdegga ah ee tirada dadka ayaa cadaadis dhab ah saaraya maaliyadda Alberta iyo adeegyada dadweynaha.

Alberta waxay wajahaysaa cadaadis aad u weyn. Koror aan hore loo arag sannadihii la soo dhaafay ayaa ka dhigay awoodda adeegyada muhiimka ah mid ka baxsan inta nidaamku maareyn karo. Dad badan macnaheedu waa in Alberta u baahan tahay fasallo badan, awood isbitaal oo badan, kaabayaal badan iyo nidaamyo taageero oo dheeraad ah xilli dakhliga ka yimaada kheyraadka aan la cusboonaysiin karin uu hoos u dhacayo. Cadaadisyadani ma kordhinayaan oo keliya khasaarihii (deficit-ka), balse sidoo kale waxay ku riixayaan gobolka inuu saadaaliyo saddex sano oo khasaare weyn ah, haddii dakhliga iyo kharashaadka hadda la qiyaasay ay sidaas ku sii socdaan.

Haddii la ansixiyo, Miisaaniyadda 2026 waxay ku jirtaa khasaare dhan $9.4 bilyan, $7.6 bilyan iyo $6.9 bilyan saddexda sano ee soo socota.

Si looga jawaabo cadaadiska maaliyadeed ee sii kordhaya, Miisaaniyadda 2026 waxay samaynaysaa maalgelin taxaddar leh iyadoo xoojinaysa dakhliga iyada oo loo marayo horumarinta dhaqaalaha, dib-u-maalgashiga Sanduuqa Heritage Fund, maalgelinta adeegga dadweynaha, dhisidda shaqaale xooggan iyo hubinta in qof walba bixiyo qaybtiisa caddaaladda ah.

Iyadoo $34.4 bilyan loo qoondeeyay nidaamka caafimaadka, Miisaaniyadda 2026 waxay taageeraysaa qalliinno badan, xoojinta helitaanka dhakhaatiirta qoyska iyo kalkaaliyeyaasha takhasuska leh (nurse practitioners), iyo ku daridda boqolaal sariiro daaweyn ah oo loogu talagalay dadka qaba dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda iyo balwadda.

Haddii la ansixiyo, Miisaaniyadda 2026 waxay gelinaysaa $10.8 bilyan nidaamka waxbarashada, taas oo ah kordhin 7.2% marka loo eego 2025–26. Maalgelintani waxay ka caawin doontaa shaqaaleysiinta macallimiin iyo kaaliyeyaal waxbarasho dheeraad ah si loo taageero fasallo sii kordhaya iyo kakanaantooda. Miisaaniyadda 2026 sidoo kale waxay gelinaysaa $3.3 bilyan saddex sano gudahood si loo dhiso kaabayaal waxbarasho oo ku baahsan guud ahaan gobolka.

"Mas'uuliyaddeennu waxay ku wajahan tahay qoysaska korinaya carruurta, shaqaalaha dhaqaalaheenna dhaqaajinaya, iyo bulshooyinka ay dadku ku tiirsan yihiin maalin kasta. Miisaaniyaddan waxay ilaalinaysaa adeegyada ay reer Alberta ku tiirsan yihiin, iyadoo hubinaysa

Classification: Protected A

inaanan caqabadaha maanta u gudbin jiilka xiga. Waxay ku saabsan tahay raadinta xasillooni marka waqtiyadu adag yihiin iyo qaadashada go'aanno ka dhigaya Alberta mid xooggan mustaqbalka fog."
*Nate Horner, Guddoomiyaha Guddiga Maaliyadda iyo Wasiirka Maaliyadda*

Sanadka 2026–27, dhaqaalaha Alberta iyo aragtida maaliyadeed waxay sii wadaan inay wajahaan caqabado ka imanaya isbeddellada dhaqaalaha caalamka. Iyadoo Maraykanku soo rogay canshuuro (tariffs) ballaaran sannadkii hore, hubanti la'aanta ganacsiga iyo qiimaha saliidda oo hooseeya ayaa sii wadi doona inay hoos u dhigaan koboca sannadkan. Wax-soo-saarka guud ee dhabta ah (real GDP) ee gobolka ayaa la saadaaliyay inuu hoos ugu dhaco 1.8%.

Hoos u dhaca kororka tirada dadka ayaa saameyn ku yeelan doona dhaqdhaqaaqa dhaqaalaha, balse sidoo kale wuxuu yareyn doonaa cadaadiska suuqa shaqada, taas oo u sahlaysa reer Alberta inay helaan shaqooyin wanaagsan. Sicir-bararka ayaa la saadaaliyay inuu ku sii dhowaado 2%, taas oo ka caawin doonta qoysaska maareynta kharashaadka maalinlaha ah isla markaana fududayn doonta miisaaniyadaha guryaha.

In kasta oo qiimaha saliiddu daciif yahay, waaxda tamarta Alberta weli waa il xoog leh. Warshadaha tamarta Alberta waxay soo saarayaan oo iibinayaan suuqyo badan oo caalamka ah. Warshadaha wax-soo-saarka (manufacturing) ayaa bilaabaya inay ka soo kabtaan caqabadihii ganacsi ee sannadkii hore, ganacsiyaduna waxaa la filayaa inay si tartiib ah u bilaabaan maalgashi marka hubanti la'aantu yaraato.

In kasta oo ay jiraan calaamado soo kabasho, cadaadisyada dhaqaale ee ballaaran ayaa muujinaya baahida loo qabo qorsheyn taxaddar leh iyo tallaabooyin go'aan adag leh si Alberta loogu hayo waddo xasilloon. Marka xaaladuhu adkaadaan, dowladda Alberta kama leexato caqabadda. Dowladda Alberta waxay diiradda saaraysaa waxa muhiimka ah, ilaalinaysaa waxa qiimaha leh, waxayna qaadaysaa tallaabooyin masuuliyad leh si ay u dejiso waddo xasilloon oo mustaqbalka gobolka ah.

**Miisaaniyadda 2026 waxay maalgelinaysaa:**

- $10.8 bilyan oo kharash hawlgal ah oo waxbarashada ah, taas oo ah kordhin 7.2% marka loo eego 2025–26, si loo taageero shaqaaleysiinta ugu yaraan 3,000 macallin cusub iyo 1,500 kaaliyeyaal waxbarasho saddex sano gudahood.
- $3.3 bilyan oo maalgelin kaabayaal ah si loo dhiso loona casriyeeyo 161 dugsi, oo ay ku jirto dardargelinta 40 mashruuc dugsi cusub sannadkan.
- $34.4 bilyan oo kharash guud oo nidaamka daryeelka caafimaadka ah, taas oo ah kordhin $1.9 bilyan (5.8%) marka loo eego saadaasha 2025–26, oo ay ka mid yihiin:
  - $13.8 bilyan oo loogu talagalay Adeegyada Caafimaadka Isbitaallada iyo Qalliinka, oo ay ku jirto $525 milyan si loo dhammeeyo 50,000 qalliin oo dheeraad ah.

  - $5.9 bilyan oo loogu talagalay Nolol-Kaalmaysan iyo Adeegyada Bulshada, si loo taageero daryeelka joogtada ah, adeegyada nolol-kaalmaysan iyo waayeelka.
  - $2 bilyan oo loogu talagalay Caafimaadka Maskaxda iyo Balwadda.
    - Tani waxay mudnaan siin doontaa daaweynta balwadda ee safka hore iyo daryeelka cilminafsiga, isla markaana dhisi doontaa xarumo faragelin naxariis leh iyo xarumo caafimaad maskaxeed oo loogu talagalay dhallinyarada.

- Gobolka wuxuu sii wadaa kobcinta Heritage Fund si loo ilaaliyo waxa ugu muhiimsan: kaydinta mustaqbalka iyo sugidda koboc iyo xasillooni maaliyadeed oo waarta.
  - Sanduuqa waxaa la filayaa inuu gaaro qiyaastii $34 bilyan dhammaadka 2026–27, isagoo ka kordhaya $31.5 bilyan ee cusboonaysiinta maaliyadeed ee rubuca labaad 2025–26.
  - Sanduuqa Hiddaha (Heritage Fund) oo la cusboonaysiiyay oo gaara $250 bilyan sanadka 2050 wuxuu u rogi doonaa xoogga kheyraadka Alberta amni maaliyadeed oo waara, iyada oo loo marayo maalgashi istiraatiiji ah oo ballaaran sannadaha wanaagsan, iyo dakhli sanadba sanadka ka dambeeya sii kordhaya, taas oo yareyn doonta ku tiirsanaanta mustaqbalka ee dakhliga kheyraadka dabiiciga ah.
- Qorshaha Raasamaalka ee Miisaaniyadda 2026 wuxuu ku jiraa $28.3 bilyan saddex sano gudahood, taas oo ah kordhin $2.2 bilyan (8%) marka loo eego Miisaaniyadda 2025. Waxay dhisaysaa waxa muhiimka u ah gobolka: dugsiyo, isbitaallo, waddooyin iyo buundooyin.
  - $3.3 bilyan saddex sano gudahood oo loogu talagalay kaabayaasha waxbarashada (K–12).
  - $4.9 bilyan oo loogu talagalay kaabayaasha caafimaadka — $1.3 bilyan ka badan Miisaaniyadda 2025 — si loo dhiso nidaam caafimaad oo taageera baahiyaha sii kordhaya ee bulshooyinka miyiga iyo magaalooyinka Alberta.

**Dakhliga**

- Dakhliga guud sanadka 2026–27 waxaa la saadaaliyay inuu gaaro $74.6 bilyan, taas oo ah hoos u dhac $0.7 bilyan marka loo eego saadaasha rubuca saddexaad ee 2025–26 oo ahayd $75.3 bilyan.
  - Hoos u dhaca 2026–27 wuxuu inta badan ka yimid $3.1 bilyan oo hoos u dhac ku yimid dakhliga kheyraadka aan la cusboonaysiin karin, taas oo ay sabab u tahay qiimaha saliidda oo la filayo inuu hoos u dhaco.
  - Dakhliga ka yimaada kheyraadka aan la cusboonaysiin karin waxaa la saadaaliyay inuu noqdo $13.2 bilyan sanadka 2026–27, marka loo eego $16.3 bilyan ee la saadaaliyay rubuca saddexaad 2025–26.
  - Dakhliga canshuurta dakhliga shaqsiga (personal income tax) waxaa lagu qiyaasay $15.9 bilyan sanadka 2026–27, taas oo ah kordhin $1.2 bilyan marka loo eego rubuca saddexaad 2025–26, iyadoo la jaanqaadaysa koboca dakhliga shaqsiyeed, lana filayo inuu gaaro $17.7 bilyan sanadka 2028–29.

- Dakhliga canshuurta shirkadaha (corporate income tax) waxaa lagu qiyaasay $7.3 bilyan sanadka 2026–27, hoos u dhac $0.1 bilyan marka loo eego saadaasha rubuca saddexaad 2025–26.
  - Si kastaba ha ahaatee, wuxuu ka sarreeyaa Miisaaniyadda 2025, taas oo ay sabab u tahay koror xooggan oo faa'iidada shirkadaha ah inkastoo ay jirto hubanti la'aan ganacsi.
  - Dakhliga canshuurta shirkadaha waxaa la filayaa inuu si dhexdhexaad ah u koro oo gaaro $7.5 bilyan 2027–28 iyo $7.6 bilyan 2028–29.
- Dakhliga kale ee canshuuraha waxaa la saadaaliyay inuu noqdo $3.6 bilyan sanadka 2026–27, taas oo ah $0.2 bilyan ka badan miisaaniyadda iyo saadaasha 2025–26, inta badan ka imanaya canshuurta shidaalka iyo canshuurta caymiska.

- Dakhliga guud waxaa la filayaa inuu koro oo gaaro $78.9 bilyan sanadka 2027–28 iyo $81.5 bilyan sanadka 2028–29, iyadoo ay horseedayaan qiimaha saliidda oo hagaagaya iyo arrimo kale oo suuqa ah.

**Kharashka**

- Kharashka guud sanadka 2026–27 waxaa la saadaaliyay inuu gaaro $83.9 bilyan, taas oo ah kordhin $4.5 bilyan (5.6%) marka loo eego saadaasha rubuca saddexaad ee 2025–26.
  o Kharashka guud waxaa la filayaa inuu gaaro $86.5 bilyan sanadka 2027–28 iyo $88.4 bilyan sanadka 2028–29, taas oo u dhiganta koror qiyaastii 2.7% sanadkii.
- Kharashka hawlgalka (operating expense) waxaa lagu qiyaasay $70.4 bilyan, taas oo ah kordhin $3.4 bilyan (5%) marka loo eego saadaasha rubuca saddexaad 2025–26.
  - Kharashka hawlgalka wuxuu kori doonaa $72.4 bilyan sanadka 2027–28 iyo $74.1 bilyan sanadka 2028–29, iyadoo celcelis ahaan uu kordhayo 2.6% sanadkii.
- Miisaaniyaddu waxay ku jirtaa ku dhowaad $38 bilyan sanadka 2026–27 oo loogu talagalay mushaharka iyo gunnooyinka shaqaalaha waaxaha adeegyada muhiimka ah sida daryeelka caafimaadka, waxbarashada, waxbarashada sare iyo adeegga dadweynaha.
- Waxaa la qoondeeyay $2 bilyan oo kayd degdeg ah (contingency) si wax looga qabto kharashaad lama filaan ah, oo ay ku jiraan musiibooyin iyo xaalado degdeg ah, iyo mudnaanooyin cusub oo soo baxa inta lagu jiro sannadka oo aan macquul ahayn in dib loo dhigo ilaa miisaaniyadda xigta.Khasaare
- Khasaare dhan $9.4 bilyan ayaa la saadaaliyay sanadka 2026–27, taas oo ka korodhay $4.1 bilyan oo ahaa khasaaraha la saadaaliyay rubuca saddexaad ee 2025–26.
- Khasaaraha waxaa la filayaa inuu hoos ugu dhaco $7.6 bilyan sanadka 2027–28 iyo $6.9 bilyan sanadka 2028–29.
- Khasaaraha la saadaaliyay ee 2026–27 inta badan waxaa sababay hoos u dhaca dakhliga ka yimaada kheyraadka aan la cusboonaysiin karin iyo kordhinta kharashaadka lagama maarmaanka u ah bixinta adeegyada muhiimka ah ee reer Alberta ee ku nool gobol si degdeg ah u koraya.

**War** saxaafadeed

**Deynta**

- Deynta ay taageeraan canshuur-bixiyeyaashu waxaa la saadaaliyay inay gaarto $108.9 bilyan sanadka 2026–27, taas oo ah kordhin $16.8 bilyan marka loo eego 2025–26.
- Kharashaadka adeegga deynta (debt servicing costs) waxaa la saadaaliyay inay noqdaan $3.4 bilyan sanadka 2026–27, koror ka yimid $2.9 bilyan ee la saadaaliyay 2025–26.
- Kharashaadka adeegga deynta waxay ka tarjumayaan heerarka dulsaarka hadda jira iyo amaahda taagan, waxaana weli lagu qiimeeyaa inay ku jiraan xuduud waara marka loo eego wax-soo-saarka guud ee Alberta (GDP) iyo saldhigga dakhliga gobolka.

**Aragtida Dhaqaalaha**

- Sanadka 2026, wax-soo-saarka guud ee dhabta ah (real GDP) waxaa la filayaa inuu koro 1.8% — hoos uga dhacay qiyaasta 2.2% ee 2025 — kadibna uu kordho 2.3% sanadka 2027.
- Kororka tirada dadka waxaa la saadaaliyay inuu hoos ugu dhaco 1.1% sanadka 2026 — marka loo eego 2.5% ee la saadaaliyay 2025 iyo rikoodhkii 4.7% ee 2024 — taas oo ka tarjumaysa bixitaanka badan ee dadka aan deggenaansho joogto ah lahayn (non-permanent residents) iyo siyaasadda dowladda federaalka ee dhimista bartilmaameedyada socdaalka.
    - Kororku wuxuu ahaan doonaa mid hooseeya 1.1% sanadka 2027, kadibna wuxuu xoojin doonaa ilaa 1.4% sanadaha 2028 iyo 2029.

**Qiyaasaha Tamarta iyo Dhaqaalaha, 2026–27**

- West Texas Intermediate (USD foostaba/bbl): $60.50
- Western Canadian Select @ Hardisty (CND foostaba/bbl): $65.30
- Farqiga light-heavy (USD foostaba/bbl): $13.00
- Gaaska dabiiciga ah ARP (CND/GJ): $3.00
- Soo-saarka saliidda caadiga ah (kun foosto/maalin): 544
- Soo-saarka bitumen ceeriin (kun foosto/maalin): 3,691
- Heerka sarrifka doolarka Kanada (USD¢/CAD$): 73.0
- Heerka dulsaarka (bond-ka Canada 10-sano, boqolkiiba): 3.2%

**Media inquiries**

Marisa Breeze
Marisa.Breeze@gov.ab.ca
780-235-4427
Xoghayaha Sare ee Warfaafinta, Guddiga Maaliyadda iyo Wasaaradda Maaliyadda